

Munaasabada Sanadguuradii 8aad ee Puntland oo lagu qabtay dalka Maraykanka



Minneapolis:- Wasiirada ka socda Dowlad Gobaleedka Soomaaliyeed ee Puntland ayaa ka qeyb galay xaflad balaaran oo ay Jaaliyada Maraykanka ku qabatay gobalka Minnesota ee dalka Maraykanka.

Wasiirka Maaliyada Mohammed Ali Yusuf, iyo Wasiir kuxigeenka Dekkada



iyo Khayraadka Puntland Md. Abduweli Abdirahman Geyre ayaa kamid ahaa marti sharaftii lagu casumay munaasabadaasi oo ay isugu yimaadeen Jaaliyada Soomaaliyeed gaar ahaan reer Puntland ee ku dhaqan gobalka Minnesota ee dalka Soomaaliya.

Munaasabaden oo ahayd mid si weyn loo soo agaasimay ayaa waxaa lagu soo bandhiyay heeso wadani ah, iyo dodo la xariira taariikhda iyo mustaqbalka Puntland.

Munaasabaden ayaa waxaa kasoo qeyb galay 450 kamid ah waxgaradka, haweenka iyo dhalinyarada Soomaaliyeed. Dhamaan Wafdigaa ka yimid Puntland ayaa sidoo kale munaasabaden ku sugnaa.



Waxaa sidoo kale halkaasi warbixino kasoo jeediyeey sadex Professor oo u dhashay dalka Maraykanka oo dhawaan safaro ku tagay gobalada Puntland. Ururka Confederation of Somali community ayaa shahaado sharaf gudoonsiiyey Inver Hills

community college iyo hawlaha horumarinta ah iyo xiriirka wadashaqeyn ay Jaamacadaasi la leedahay Jaamacada Nugaal University ee gobalada Puntland. Sidoo kale Waxaa shahaado sharaf noocaas oo kale ahna la guddoon siiyey maamulka Minneapolis community and technical College oo xiriir wadashaqeyn iyo horumarin ah ka dhaxeeyo Puntland State University.

Abdimalik Askar
aabdimalik@hotmail.com

FAAFIN: www.SOMALITALK.COM | Agoosto 19, 2006